

Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska – MRSA (Methicillin-Resistant Staphylococcus Aureus)

Gacaliye Qoys:

Waxa laga yaabaa in uu ilmahaagu qaaday **MRSA**. Caabuuq maqaarka ah oo bakteeriya sababto

Waa maxay astaamuhu? Xabuun, casaan, barar iyo dareere ama malax ku jirta meesha bugta.

Sidee ayey ku faaftaa? Dareere ka yimaada qofka xanuunsan ama alaab wasakhaysan oo taabta maqaarka qof aan xanuunka qabin (meel jaran, xoqan). Ku dhiiri gali caruurta in ay maydhaan gacmaha inta badan oo ka ilaali in ay taabtaan dhaawacyada dadka ama alaabta qof kale leeyahay.

Goorma ayey astaamuhu bilaabmaan? Todobaadyo ama bilo ka dib marka uu xanuunku haleelo.

Ma loo baahan yahay ilmaha in guriga lagu hayo? Haa, ilamaa dareeraha ay ku jiri karaan dhayitaan qalalan oo nadiif ah, ama qoraal ka yimaada Bixiye Caafimaad.

Haddii uu ilmahaagu yeesho calaamadahan ogaysii Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka si uu u helo daawaynta lagama maarmaanka ah. Haddii ilmahaaga lagu ogaado in uu qabo mononucleosis fadlan ogaysii macalinkaaga Head Start/ECEAP.

Shaqaalaha: _____ Taleefanka: _____

Xarunta: _____